

This guidance was withdrawn on 1 April 2022

The information in this guidance has been superseded by [Infection prevention and control in adult social care: COVID-19 supplement.](#)



Department
of Health &
Social Care

Ka fal-celinta COVID-19

**Xayndaab-hawleedka Anshaxa ee Daryeelka Bulshada
ee Dadka Waaweyn**

12/03/2020

Tusmada

Horudhac	2
Sida loo isticmaalo xayndaab-hawleedka	3
Qiyamka iyo mabaadii'da	4
1. Qadarin	4
2. Macquul ahaanshaha	5
3. Yareynta Waxyeelada	5
4. Ka mid-ahaanshaha	6
5. La Xisaabtanka	7
6. Dabacsanaanta	8
7. Isu dhignaanshaha	8
8. Bulshada	9

Horudhac

Cudurka hadda jira ee 'coronavirus' (COVID-19) ee dillaacay, oo bilaabmay Diseembar 2019, wuxuu saameyn weyn ku yeelan doonaa adeegyada caafimaadka iyo daryeelka ee UK. Sida ku cad [Qorshaha Waxqabadka Coronavirus](#), oo la daabacay 3-dii Maarso 2020, nidaamyada daryeelka caafimaadka iyo bulshada ee UK waxay si weyn isugu diyaariyeen sanadihii la soo dhaafay cudur faafaya waxayna si fiican ugu diyaar garoobeen inay difaac ballaaran siiyaan dadweynaha. Dabcan, ka fal-celinta saxda ah ee COVID-19 waxaa la waafajin doonaa dabecadda, cabirka iyo goobta halistu ka jirto iyadoo fahamkeenna arintan ay mar walba sii kordheyo.

Dowladaha Hoose iyo guud ahaan shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka waxay wajahaan go'aanno adag maalin walba, hase yeeshe, qorsheynta iyo ka fal-celinta COVID-19 marka ay sii korodhaba waxay shaki la'aan u baahan doontaa sameynta go'aanno adag iyadoo la wajahayo cadaadis cusub oo adag oo haddana lagu sameynayo waqti, dhaqale ama macluumaad xaddidan. Go'aamadaan waxay noqon karaan kuwa shaqsiyeed, oo la xiriira qoysaskeena, daryeelayaasha iyo bulshada, ama waxay ku yeelan karaan saameyn ballaaran abaabulka iyo gaarsiinta adeegyadayada caafimaadka iyo daryeelka. Go'aamada waxaa loo baahan doonaa in loo sameeyo si waafaqsan sharciga iyo hagista rasmiga ah ee la soo saaray lana dabaqayo waqtigaas, iyo iyadoo la fulinayo masuuliyaddaha sharciga iyo masuuliyaddaha xirfadeed.

Xayndaab-hawleedkani wuxuu hiigsanayaa inuu taageero u fidiyo qorshaynta ka fal-celinta socota iyo go'aan-qaadashada si loo hubiyo in tixgelin ballaaran la siiyo taxane ah qiyam anshaxeed iyo mabaadi'da markii la abaabulayo lana bixinayo daryeelka bulshada ee dadka waaweyn. Aqoonsiga cadaadiska sii kordhaya iyo baahida la filayo, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto in la qaato go'aanno adag oo ku saabsan sida loogu wareejiyo dhaqaalaha halka aadka looga baahan yahay iyo in mudnaanta la siiyo baahiyaha daryeelka shaqsiyeed. Xayndaab-hawleedkani wuxuu hiigsanayaa inuu u noqdo hage go'aannada noocan oo kale ah, isla markaana uu xoojiyo tixgelinta wixii waxyeelo ah ee ka iman kara, iyo baahida dhammaan shakhsiyadka, ayaa had iyo jeer udub-dhexaad u ah go'aan-qaadashada. Walwal iyo ixtiraam la mid ah waa in la siiyaa dhammaan shaqsiyaadka, qoysaskooda iyo daryeelayaashooda, iyo bulshada, iyo sidoo kale xirfadlayaasha iyo mutadawiciinta aan ku tiirsanaan doonno si loo hubiyo gaarsiinta adeegyadayada iyo himilooyinkeenna.

Maaddama faafitaanku uu saameynayo bulshada guud ahaan, qof walba wuxuu yeelan doonaa doorkiisa uu ka ciyaarayo si loo taageero ka fal-celinta socota iyo tan mustaqbalka. Waa muhiim in xirfadlayaasha, hay'adaha iyo wakaaladaha dawlaga ahi ay si wadajir ah uga shaqeeyaan heer degmo iyo heer qaran, iyo in qorshaynta iyo waxqabadyada heer qaran, heer gobol iyo heer degmo ay si wanaagsan isugu dubbaridan yihiin. Diiwaanada ku habboon waa in la hayaa gaar ahaan kuwa go'aanada lagu qaadanayo iyo cudur daarkooda si loo hubiyo isla xisaabtanka iyo in lala wadaago wax ka barashada dadka kale inta lagu jiro iyo sida uu cudurku u faafaba.

Dukumiintigan waxaa laga habeeyay oo laga cusbooneysiiyay xayndaab-hawleedka anshaxeed ee markii ugu horeysay uu soo diyaariyey Guddiga Arimaha Anshaxa ee Hargab-qandhoolaha sanadkii 2007, kaasoo markii dambe ay dib u eegtay Wasaarada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada sanadkii 2017.

Sida loo isticmaalo xayndaab-hawleedka

Xayndaab-hawleedkan waxaa loogu talagalay qorsheeyayaasha iyo dejiyayaasha siyaasada isticmaalka ee heer degmo, gobol iyo heer qaran si ay u taageeraan qorsheynta ka fal-celinta iyo abaabulka daryeelka bulshada ee dadka waaweyn inta lagu jiro iyo sida uu COVID-19 u faafaba. Waxay sidoo kale ujeedadiisu tahay inuu taageero shaqada xirfadleyda iyo kuwa kale ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo bulshada kuwaas oo horumarinaya siyaasadaha kana fal-celinaya dillaaca cudurka, iyadoo la waafajinayo xeerarkooda xirfadeed u gaarka ah iyo sharci-hoosaadyadooda. Mabaadi'daas sidoo kale waxaa si ballaaran loogu dhaqi karaa aaga daryeelka bulshada.

Daryeelka bulshada waa adeeg maxalli ah oo lagu bixiyo si maxalli ah waxaana lagu dhisay faham faahfaahsan oo ku saabsan shakhsiyaadka iyo qoysaskooda, bulshada iyo dhaqankooda. Shaqaalaha bulshada, daaweeyayaasha shaqada iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ayaa ka mid ah kooxaha xirfadlayaasha muhiim ah waxayna leeyihiin mas'uuliyado cad iyo isla xisaabtan ku saabsan xeerarkooda xirfadeed iyo hagayaashooda. Hogaamiyayaasha xirfadlayaasha ah ee deegaanka, sida Maamulayaasha Shaqaalaha Bulshada iyo Mamulaha Daweeyayaasha Shaqada, ayaa muhiim u noqon doona hubinta xayndaab-hawleedkan in lagu dhaqmo oo la fahmo. Sidaa darteed, xirfadaha xirfadlayaashani waa in loo adeegsadaa inay gacan ka geystaan horumarinta iyo dib u eegista habab-hawleedyadii lagu heshiiyey ee maxaliga ahaa.

Dabcan, marka laga soo tago tixgelinta anshaxa, go'aan kasta wuxuu u baahan doonaa tixgelinta samaqabka shaqsi, guud ahaan wanaagga bulshada iyo dhaqaalaha la heli karo. Qiyamka iyo mabaadi'da waa inay u noqdaan bar bilow ah oo lagu hago go'aan qaadashada, oo ay taageerayaan aragtida xirfadlayaal hoggaamineed, iskaashi laga yeesho dhinacyada kala duwan iyo ururada, iyo xaddiga macluumaadka laga heli karo xaalad kasta oo gaar ah. Qiyamka anshaxa iyo mabaadii'da ayaa si isku mid ah ugu habboon kuwa u baahan daryeelka bulshada ee laga yaabo inay leeyihiin nuglaansho sii kordheysa, kuwa u baahan kara daryeel bulsho, iyo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee la kulmi kara culeysyo cusub oo lama filaan ah marka ay gaarayaan go'aanno adag iyo bixinta daryeel iyo taageero inta lagu jiro iyo sida u faafo COVID-19.

Way fiicnaan laheyd in xayndaab-hawleedka loo isticmaalo si liis hubineed ah si loo hubiyo in tixgelinta anshaxa lagu xisaabtamayo, si kastaba ha ahaatee, qiyamka iyo mabaadi'da lagu sharaxay dukumiintigan ma aha kuwo dhammaystiran. Markaad fulineyso qiyamka anshaxa iyo mabaadi'da ee xaaladaha degdegga ah iyo kuwa aan la hubin, waxaad la kulmi kartaa xiisad u dhaxeysa taas oo u baahan doonta go'aan in lagu sameeyo illaa heer qiime gaar ah ama mabda' lagu dabaqi karo xaaladda go'aan kasta oo gaar ah. Xaaladaha oo dhan, ixtiraamka iyo macquulnimada waa in loo adeegsadaa aasaaska, mabaadi'da aasaasiga ah ee hagta qorshaynta iyo taageeridda go'aanada.

Qiyamka iyo mabaadii'da

Qaybtani waxay tilmaamaysaa qiyam kasta oo anshaxa ah iyo mabda' ah iyo ficillada la xiriira iyo ku-dhaqanka ugu fiican marka la tixgelinayo lana dabaqayo. Kuwani waa in lala tixgeliyaa xeerarka anshaxa ee xirfadeed iyo hagitaankii rasmiga ahaa ee ugu dambeeyay iyo sharciyada marka iyo sida ay kuwani u khuseeyaan. Mabaadi'da ayaa loo taxay si tixraacooda loo fududeeyo laakiin looma kala horraysiin sida ay u kala mudan yihiin ama loo dhammaystiray - ma jiraan jawaabo dhammaystiran oo lagu gaari karo go'aannada uga saxsan ama kuwa ugu anshaxa badan.

Markauu dhaqaaluhu xaddidan yahay oo ay jiraan baahiyo sii kordhaya, waxaa dhici karta in aysan suurtagal aheyn in la tixgeliyo dhammaan mabaadi'da ama ficilada ka hooseeya. Mabda' kastaa waa in loo tixgeliyaa ilaa inta suuragalka ah ee xaalad kasta, iyada oo si ku habboon loo maareynayo halista iyo tixgelinta samaqabka shaqsi, guud ahaan wanaagga dadweynaha iyo macluumaadka iyo dhaqaalaha la heli karo.

1. Qadarin

Mabda'ani waxaa lagu qeexaa aqoonsiga in qof walba iyo xuquuqdiisa aadanaha, xulashooyinka shaqsiyeed, badbaadada iyo sharafta ay leeyihiin ay muhiim tahay.

Si loo hubiyo in dadka loola dhaqmo si qadarin leh, kuwa go'aannada gaarayaa waa inay:

- Siiyaan dadka fursad ay ku muujiyaan aragtidooda ku saabsan arrimaha saameynaya daryeelkooda, taageeradooda iyo daaweyntooda
- Qadariyaan xulashada shaqsiyeed ee dadka inta ugu badan ee suurtagalka ah, iyada oo laga fikirayo lalana wadaagayo saameynta waqtigan xaadirka ah iyo mustaqbalka
- Dadka ku wargeliyaan sida ugu macquulsan ee waxa dhacaya ama waxa la filayo inay ku dhacaan xaalad kasta oo jirta
- Marka uu qofku awood la'aan karo (sida lagu qeexay Sharciga Awoodda Maskaxda), hubi in danta ugu fiican iyo baahida qofka ay tixgeliyaan kuwa mas'uulka ka ah ama leh awood sharci oo ku habboon oo ay go'aan iyaga uga gaarayaan
- Ku dadaalaan inay taageeraan dadka si ay u helaan waxa ay xaqa u leeyihiin, iyada oo ku xiran dhaqaalaha la heli karo, iyadoo la hubinayo inay jirto go'aan caddaalad ah iyo cudurdaar cad oo ku saabsan go'aan kasta oo laga gaarayo mudnaan-siinta.

2. Macquul ahaanshaha

Mabda'ani waxaa lagu qeexay inuu hubinayo in go'aannada ay yihiin kuwo caqli gal ah, caddaalad ah, wax ku ool ah, kuna saleysan habab ku habboon, caddeyn la heli karo iyo cudurdaar cad.

Marka laga fekerayo sida go'aanku uu macquul u yahay, kuwa go'aannada gaarayaa waa inay:

- Hubsadaan in go'aanka la gaaray uu yahay mid wax ku ool ah oo leh fursad macquul ah oo uu ku shaqeyn karo.
- Go'aannada ku saleeyaan caddeynta iyo macluumaadka la heli karo waqtigaas, iyada oo laga digtoon yahay halista la og yahay iyo faa'iidooyinka laga yaabo in laga heli karo
- Tixgeliyaan xulashooyinka kale iyo qaabab kale oo lagu fikiri karo, iyaga oo ka warqabaya fikradaha kala duwan ee ka imanaya dhaqamada iyo bulshada
- Adeegsadaan go'aan qaadasho cad oo caddaalad ah oo ku habboon waqtiga iyo xaalada go'aanka lagu qaadanayo waana in lagu sameeyaa jawi u oggolaanaya fikradaha in loo tixgeliyo si dhab ah

Mabda'ani waa in lala tixgeliyaa xayndaab-hawleedka sharciga iyo siyaasadda khuseeysa ee la xiriirta arimaha sinnaanta. In kasta oo laga yaabo in dhaqaalaha xaddidmaan, waa in loo taagnaadaa in dadka qaba baahiyo isu dhigma ay helaan fursado isku mid ah si loo daboolo baahiyahaas.

3. Yareynta Waxyeelada

Mabda'aani waxaa lagu qeexay inuu yahay mid ku dadaalaya yareynta xaddiga waxyeelada jireed, nafsiyeed, bulsho iyo dhaqaale ee uu dillaaca cudurka u keeni karo shaqsiyaadka iyo bulshada. Taa baddalkeeda, arintani waxay ku lug leedahay hubinta in hay'adaha iyo bulshada guud ahaan ay la qabsadaan kana soo kabtaan intii karaankooda ah

Waa muhiim in kuwa mas'uulka ka ah ay u dadaalaan inay:

- Aqoonsadaan oo la xiriiraan in qof kasta door ku leeyahay yaraynta faafitaanka - tusaale ahaan, ku dhaqmidida gacmo dhaqista ama kala fogaanshaha bulshada
- Yareeyaan khatarta dhibaatooyinka haddii ay dhacdo in qof uusan caafimaad qabin
- Bixiyaan warbixinno joogto ah oo sax ah oo gudaha bulshada iyo hay'adaha ah

- La wadaagaan wax ka barashada khibradaha maxalliga, qaran iyo caalami ee ku saabsan habka ugu wanaagsan ee loo daaweyn karo loogana fal-celin karo dillaaca cudurka mar kasta oo uu fahamka COVID-19 sii kordho
- U oggolaadaan shaqaalaha daryeelka iyo mutadawiciinta inay gaaraan go'aanno xog-ogaal ah oo taageeraya dadka nugul

4. Ka mid-ahaanshaha

Mabda'ani waxaa lagu qeexay inuu hubinayo in dadka la siiyo fursad habboon oo ay ku fahmi karaan xaaladaha, laguna daro go'aamada iyaga saameeya, isla markaana ay ku soo bandhigaan aragtidooda iyo caqabadahooda. Dhanka kale, go'aannada iyo ficillada waa inay ujeedadoodu tahay in la yareeyo sinnaan la'aanta sida ugu macquulsan.

Si loo hubiyo ka mid-ahaanshaha illaa iyo inta suurtagalka ah, kuwa go'aannada gaarayaa waa inay:

- Ka qaybgeliyaan dadka dhinacyada qorshaynta ee saameeya iyaga, daryeelkooda iyo daaweyntooda, iyo bulshadoodaba
- Ka qaybgaleliyaan qoysaska iyo daryeeleyaasha dhinacyada qorshaynta ee saameynaya iyaga iyo shakhsiga ay daryeelaan
- Hubiyaan in qof gaar ah ama koox gaar ah aan laga reebayn ka-qaybgalka
- Tixgeliyaan saameyn kasta oo aan dheelitirnayn oo go'aanka uu ku ridi karo dad ama kooxo gaar ah
- In ay siiyaan la hadal ku habboon dhammaan dadka ku lugta leh, iyada oo la adeegsanayo habab badan oo isgaarsiineed iyo qaabab loo baahan yahay si loo gaaro dad iyo bulshooyin kala duwan
- Noqdaan kuwo daah-furan oo cudurdaar cad haysta marka la go'aansado in loola dhaqmo qof ama koox si ka duwan kuwa kale, taas oo muujineysa sababta ay u habboon tahay in sidaas la yeelo

Halka ay ku habboon tahay, arimaha kor ku xusan waa in lala tixgeliyaa xayndaab-hawleedyada sharciga ah iyo siyaasadaha la xiriira sinnaanta ee wax ku kordhin doona go'aan qaadashada loo dhan yahay iyada oo la hubinayo in caqabadaha gaarka ah ee adeegga laga yareeyo kuwa laga yaabo inay yihiin ama noqdaan ku dhibanayaal marka uu cudurku dillaaco.

5. La Xisaabtanka

Mabda'ani waxaa lagu qeexay inuu yahay la xiisaabtanka dadka, iyo nafteenaba, xisaabtanka go'aamada la gaaro iyo sida loo gaaro. Taa baddalkeeda, arintani waxay u baahan tahay daah furnaan ku saabsan sababta go'aannada loo qaadanayo iyo cidda mas'uulka ka ah sameyntooda iyo la socodsiiintoodaba.

Kuwa masuulka ka ah waa inay qaadaan mas'uuliyadda go'aanadooda iyo falalkooda iyaga oo:

- Ku shaqeynaya oo gaarsiinaya natiijooyinka looga baahan yahay mas'uuliyadooda iyo waajibaadkooda shakhsiyaadka, qoysaskooda iyo daryeelayaashooda, iyo shaqaalaha
- U hogaansamaya hagista rasmiga ah, waajibaadka sharciga, iyo xeerarka xirfadeed ee waqtigaas
- Daah-furnaan ka noqdaansida iyo nooca go'aannada loo baahan yahay in la sameeyo iyo waxa ay ku saleysan yihiin
- Diyaar u noqonaya sababaynta go'aanada la gaarey iyo sababta loo gaarey, hubinta in la hayo diiwaanada ku habboon
- Taageeraya dadka kale inay qaadaan masuuliyada go'aanadooda iyo falalkooda

Hay'adaha dhexdooda, arintani waxaa sidoo kale ku jiri doona:

- Sii wadidda gudashada xilalka iyo waajibaadka shaqo ilaa si macquul ah loogu arko in aan sidaa la yeelin
- Bixinta jawi ay shaqaaluhu ugu shaqeyn karaan si badbaado leh, wax ku ool ah oo wadashaqeyn leh, taas oo ilaalinaysa caafimaadkooda iyo xaalad-wanaagooda inta uu dillaaca cudurku sodo
- Bixinta hagitaan iyo taageero ku habboon shaqaalaha laga yaabo in laga codsadey inay ka shaqeeyaan meel ka baxsan aaggooda caadiga ah ee ay khibrada u leeyihiin ama aan awoodin inay qabtaan qaar ka mid ah howlahooda maalinlaha ah
- Haysashada habab maxalli ah oo lagu heshiiyey si loo maareeyo caqabadaha anshaxa inta lagu jiro iyo ka dib faafitaanka cudurka

6. Dabacsanaanta

Mabda'ani waxaa lagu qeexay inuu yahay mid fal-celin leh, karti u leh, isla markaana diyaar u ah inuu la qabsado marka uu la kulmo xaaladdo isbeddelay ama kuwo cusub. Waa muhiim in mabda'ani lagu dabaqo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka iyo guud ahaan aaga, si loo fududeeyo la qabsiga iyo wada shaqeynta.

Si loo hubiyo dabacsanaanta, kuwa go'aannada gaaraya waa inay u diyaargarobaan:

- Ka fal-celinta iyo laqabsiga isbeddelada marka iyo goorta ay dhacaan - tusaale ahaan, haddii la helo macluumaad cusub oo soo baxaya ama heerarka baahida oo is beddeley
- Hubinta in qorshayaasha iyo siyaasaddu ay leeyihiin waasacnimo lagu sameyn karo dabacsanaan iyo hal-abuurnimo marka loo baahdo
- Siinta dadka fursadda ugu badan ee suurtagalka ah si ay uga hortagaan go'aannada iyaga saameeya waqtiga la haysto in looga hortago gudaheed
- Hubinta in shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka lagu taageerayo inay si wadashaqeyn leh uga shaqeeyaan dhinacyada kala duwan iyo hay'adaha, sida ula qabsiga badan uguna adkeysiga badan ee suurtagalka ah
- Dib u-eegidda hab-dhaqanka ha'yadaha, hab-dhaqanada caadiga ah iyo heshiisyada qandaraasyada ee caqabad ku noqon kara hamigaas

7. Isu dhignaanshaha

Mabda'ani waxaa lagu qeexay inuu yahay bixinta taageero u dhiganta baahida iyo awoodaha dadka, bulshooyinka iyo shaqaalaha, iyo faa'iidooyinka iyo halista lagu ogaado howlaha go'aan qaadashada.

Marka la tixgelinayo isu dhignaanshaha, kuwa mas'uulka ka ah waa inay:

- Caawiyaan dadka leh baahiyaha daryeelka iyo taageerada ilaa iyo intii suurtagalka ah
- Ku dhaqamaan sharciga ama masuuliyaddaha gaarka ah, iyada oo la xusuusanayo wixii waajibaad ah ee isbedela marka uu dillaaca cudurku sii bato
- U fidiyaan taageero kuwa leh mas'uuliyado dheeri ah ama cusub si ay u daryeelaan dadka kale.
- Siiyaan taageero dadka laga codsaday inay qaataan halisyo dheeraad ah ama ay wajahaan culeysyo dheeri ah, iyada oo la isku dayayo in la yareeyo kuwan sida ugu macquulsan

- Siiyaan taageero ku habboon iyo la hadal shaqaalaha laga yaabo inay la kulmaan cadaadisyo lama filaan ah ama cusub

8. Bulshada

Mabda'ani waxaa lagu qeexay ballanqaad ah in si wadajir ah looga gudbo dillaaca cudurka iyadoo la is taageerayo lana xoojinayo bulshadeena sida ugu fiican ee aan awoodno.

Qof kasta oo ku lug leh door buu ku yeelan doonaa ka fal-celinta dillaaca cudurka saameyn ayuuna si ugu yeelan doona qof walba, sidaa darteedna waa inuu:

- Qof walba la shaqeeyaa taageeraana qofba qofka kale si loo qorsheeyo, wax looga qabto, loolana noolaado dillaaca cudurka
- Taageeraa shabakadaheena iyo bulshooyinkeena si aan u xoojinno ka fal-celinta isla markaana aan u daboolno baahiyaha soo kordha - tusaale ahaan, adiga oo caawinaya oo daryeelaya deriska, asxaabta iyo qoyska
- Ka digtoonaannaa dabeecadaheena iyo go'aamadeena, iyo sida ay taasi u saameyn karto dadka kale
- La wadaag wax ka barashada khibradaha kuu gaarka ah ee laga yaabo inay caawiso dadka kale

© Xuquqda daabacaade ee Crown 2020

Waxaa lagu daabacay GOV.UK iyada oo pdf ah oo keliya.

[Xafiiska Madaxa Shaqalaha Bulshada]

www.gov.uk/dhsc

Daabacaaddan waxaa ruqsad lagu siiyey shuruudaha Laysanka Dawladda ee Furan v3.0 marka laga reebo marka si kale lagu sheegay. Si aad u aragto laysankan, booqo

nationalarchives.gov.uk/doc/open-government-licence/version/3

Meesha aan aqoonsanay cid kale oo leh xuquuqda daabacaadda waxaad u baahan doontaa inaad ka hesho oggolaansho kuwa haysta xuquuqda daabacaadda ee ay khusayso.

